

New Proposed Constitution According to Jamhuuriya 20/8/1999

QAYBTA KOOWAAD

TILMAANTA IYO XORRIYAADKA AASAASIGA AH

XUBINTA 1AAD

TILMAANTA GUUD

QODOBKA 1AAD

DAWLADDA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

1.. Dalkii maxmiyadda ahaa ee 26kii Juun 1996kii gobanimadiisa ka qaatay boqortooyadii midowday ee Ingiriiska iyo woqooyiga Ayrland (United Kingdom of Great Britain and Northern Ireland), lana odhan jiray maxmiyadda Somaliland, kuna biiray Soomaaliya Idii July 1960kii si ay u wada curiyaan Jamhuuriyadda Soomaaliyeed (Somali Republic), ee kula soo noqday gooni-isu-taaggiisa go'aankii shirkii Beelaha Somaliland ee Burco 27kii April ilaa 15 May 1991kii, waxa uu halkan ku noqonayaa sida waafaqsan Dastuurkan, Dal madax-bannaan oo leh xaqa iyo karaamada Qaranimadiisa, kuna magacaaban "Jamhuuriyadda Somaliland".

2.. Awoodda iyo karaamada Qaranimada waxa leh shacbiga; wuxuuna u adeegsanayaa si waafaqsan xeerarka dalka.

QODOBKA 2AAD

DALKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

a.. Dalka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu fidsan yahay intii ay ahayd xuduudii maxmiyadda Somaliland oo tilmaan ahaan ku taalla dhigaha (Latitude) 8o ilaa 11o 30' Woqooyiga dhulbadhaha iyo loolka (Longitude) 42 o 45' ilaa 49 o Bariga; waxaanay soohdimihiisu ka kooban yihiin berriga, Jasiiradaha, biyaha goboleed, dhulka iyo badaha hoostooda, hawada sare iyo xeebleyda (Continental shelf).

b.. Jamhuuriyadda Somaliland waxay xad la wadaagtaa dhinaca woqooyi Gacanka Cadmeed, dhinaca Bari Soomaaliya; dhinaca koonfureed iyo dhinaca galbeed Itoobiya; dhinaca woqooyi galbeed Jabuuti.

c.. Geyiga Qaranku waa muqaddas; waana laguma xad-gudbaan.

QODOBKA 3AAD

MAGAALO MADAXDA

Magaalo Madaxda Jamhuuriyadda Somaliland waa HARGEYSA.

QODOBKA 4AAD

JINSIYADDA

a.. Qof kasta oo u dhashay Somaliland, kana Issiran dadkii degenaa dalka Somaliland 26kii Juun 1960kii iyo ka hor, waxa loo aqoonsanayaa muwaadin Somaliland.

b.. Xeer baa caddaynaya sida lagu heli karo ama lagu waayi karo Jinsiyadda Somaliland.

QODOBKA 5AAD

DIINTA

a.. Diinta Qaranka Somaliland waa Diinta Islaamka; waxaana geyiga Somaliland ka reeban faafinta diin aan ahayn Diinta Islaamka.

b.. Xeerarka dalka waxaa laga qaadanayaa shareecadda Islaamka; waxaana reeban wixii xeer ah ee ka soo hor jeeda.

c.. Dowladdu waxay oogaysaa shacaa'irta diiniga ah (umuurta Diinta), waxaanay fulinaysaa axkaamta shareecadda. Sidoo kale waxay ka hor tegaysaa fisqiga iyo anshax xumada.

d.. Tirsiga taariikhda waxa laga raacayaa tan islaamiga ah ee Hijriyadda iyo tan Miilaadiyada ah.

QODOBKA 6AAD

AFKA

a.. Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland waa Af-Soomaaliga; Afka labaadna waa af-Carabiga.

b.. Afafka kale waxa loo adeegsan karaa wixii looga maarmi waayo.

QODOBKA 7AAD

CALANKA

Calanka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu ka kooban yahay saddex midab oo isle'eg oo ballaadh u goglan, midabka sare waa Doogo, dhexdiisana ay ku qoran tahay Laa Ilaaha Illa-Allaah Muxamadu Rasuul-Allaah oo Af Carabi ah, oo midab cad ah; midabka dhexe waa caddaan ay badhtanka kaga taallo xiddig madow oo shan geesley ah, madaxyo simanna leh; midabka hoose waa casaan saafi ah.

QODOBKA 8AAD

ASTAANTA

Astaan Qaranku waa Galaydh Buniya oo uu ka dambeeyo Miisaan ay labadiisa kafadood hareeraha galaydhka ka muuqdaan. Laba caleemood oo doog ah ayaa hoosta

iyo hareeraha kaga wareegsan galaydhka, labada caleemood baarkooda inta u dhaxaysa waxa ku yaal Bisinka oo ku qoran afka Carabiga.

QODOBKA 9AAD

HEESTA QARANKA

Heesta Qaranku waa mid muujinaysa bartilmaameedyada Dastuurka, caqiidada ummadda, hab-dhaqmeedka wada-tashi; waxay yeelanaysaa miyuusik u gaar ah oo ka duwan kuwa dalalka kale; waxaana lagu soo saarayaa xeer.

QODOBKA 10AAD

SINNAANTA MUWAADINIINTA

a.. Muwaadiniinta Somaliland iyadoon lagu kala saarayn, midabka, qabiilka, dhalashada, luqda, lab iyo dhedig, hantida, mudnaanta, afkaarta, waxay sharciga hortisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad siman.

b.. Kala sarreynta iyo takoorka ku salaysan isirka, abtirsiga, dhalashada iyo deegaanku waa reebban yihiin.

c.. Ajaanibka dalka Somaliland sharci ku jooga waxay xeerka hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la siman tan muwaadiniinta, oo ay ka reebban tahay xuquuqda siyaasiga ah ee muwaadiniinta u gaarka ah.

XUBINTA 2AAD

QODOBKA 11AAD

NIDAAMKA SIYAASADEED

a.. Nidaamka siyaasadeed ee Jamhuuriyadda Somaliland waxa saldhig u ah nabad, talo-wadaag, Dimuqraadiyad iyo hannaanka xisbiyada badan.

b.. Xisbiyada siyaasiga ah iyo hab-dhismeedkooda waxa qeexi doona xeer.

XUBINTA 3AAD

XUQUUQDA QOFKA, XORRIYADA AASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA SAARAN MUWAADINKA

QODOBKA 12AAD

Xuquuqda Qofka Garsoorka hortiisa, xuquuqda Siyaasadeed, Waxbarasho, Caafimaad, Dhaqaale, Bulsho, Hidde, Doorasho, Xorriyadda Dhaqdhaqaaqa, Xorriyada is-abaabulka, Xaqa nolosha, Xaqa Nabadgelyeynta jidhka qofka, Xaqa Xorriyadda, Xaqa Dacwadda iyo is-difaaca, Xaqa xurmeynta Hoyga, Xorriyadda Isgaadhsiinta, Xorriyadda lahaanshaha Hanti gaar ahaaneed, Xorriyadda Bannaanbaxa iyo ra'yi dhiibashada, xaqa xurmeynta magac-samida iyo nolosha gaar ahaaneed, Xorriyadda

Caqiidada, Xorriyadda saxaafadda iyo warbaahinta kale, Xaqa damaanad-qaadka iyo shuruudaha xuquuqda iyo xorriyaadka, waxa loo raacayaa xeerarka dalka u dejisan.

QODOBKA 13AAD

WAAJIBAADKA MUWAADINKA

a.. Muwaadin kasta waxa waajib ku ah, adkaynta midnimada ummadda, ilaalinta jiritaanka Qaranimada iyo difaaca dalka iyo diinta si waafaqsan xeerarka.

b.. Qof kasta waxa ku waajib ah in uu xaq dhawro-Dastuurka iyo xeerarka dalka waafaqsan Dastuurka iyo Diinta Islaamka.

c.. Qof kasta waxa ku waajib ah in uu si hagar la'aan ah u bixiyo cashuurta iyo takaaliifta kale ee xeerku waajibiyey.

d.. Qof kasta waxa waajib ka saaran yahay daryeelka, ilaalinta iyo badbaadada deegaanka.

QODOBKA 14AAD

DAMBIYADA LAGA GALO XUQUUQDA AADAMAHA

Dembiyada laga galo xuquuqda qofka sida xasuuqa, dil maxkamad la'aan ah, jidh-dilka, ma laha muddo dhaaf, hanti laga qaato, la dafiro.

QODOBKA 15AAD

ISU-CELINTA EEDAYSANAHA AMA DEMBIILAHA IYO MAGAN-GELINTA SIYAASADEED

a.. Jamhuuriyadda Somaliland waxay dib-u-celin kartaa dembiile ama eedaysane dlakiisa ka soo cararay, haddii uu jiro heshiis dhex maray Jamhuuriyadda Somaliland iyo dalka weydiistay celintiisa. Waxa ka reeban cid islaam ah in aan gacanta loo gelin gaal ka gardaran.

b.. Qofka shisheeyaha ah ee dalka ku soo galay ama ku joogay si xeerka waafaqsan ee weydiista magangelyo siyaasadeed, waa la siin karaa haddii uu buuxiyo shuruudaha ku xusan xeerka u dhigan magan-gelinta.

QODOBKA 16AAD

XUQUUQDA HAWEENKA

a.. Xuquuqda, xorriyaadka iyo waajibaadka Dastuurku xaqiijiyey, haweenku ragga way ula siman yihiin, wixii shareecada islaamka midkood u gaar yeeshay mooyaane.

b.. Xukuumaddu waa in ay dhiirri-gelisaa xaqa ay haweenku u leeyihiin in ay ka xoroobaan dhaqamada aan shreeada waafaqsanayn ee waxyeellada u leh jidhkooda iyo damiirkooda.

c.. Haweenku waxay xaq u leeyihiin in ay hanti yeeshaan, maamulaan, kormeeraan, adeegsadaan; gudbin karan si shareecada waafaqsan.

d.. Si sare loogu qaado aqoonta iyo dakhliga haweenka iyo weliba daryeelka qoyska, haweenku waxay xaq u leeyihiin in loo fidiyo waxbarashada dhaqaalaha qoyska iyo in loo furo dugsiyada farsamada iyo xirfadaha gaarka ah iyo kuwa waxbarashada dadka waaweyn.

QAYBTA LABAAD

QAAB DHISMEEDKA QARANKA

QODOBKA 17AAD

KARAAMADA IYO AWOODDA QARANKA

a.. Eebaha ummadda Somaliland ku beeray geyigani waxa uu ugu deeqay awood iyo karaamo Qaranimo. Shacbiga Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu awooddaas iyo karaamadaas sida ku cad Dastuurka u igmaday dawlad ku dhisan doonta kuna dhaqanta Dastuurka.

b.. Dhismaha Qaranku waxa uu ka kooban yahay saddex waaxood oo kala ah; xeer-dejinta, fulinta iyo garsoorka. Kala xadaynta awoodaha saddexda waaxood waxay yihiin sida uu Dastuurku dhigayo. Waax waliba awoodda Dastuurku u gaar yeelay way u madax-bannaan tahay.

XUBINTA 1AAD

WAAXDA XEER-DEJINTA

QODOBKA 18AAD

BAARLAMAANKA

a.. Awoodda xeer-dejinta ee Jamhuuriyadda Somaliland waxay gaar ku tahay Baarlamaanka oo ka kooban laba gole oo kala ah Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida.

b.. Mashruuc-sharci Baarlamaanku oggolaadeen wuxuu xeer dhaqan gal ah noqonayaa marka uu Madaxeynuhu saxeexo.

c.. Baarlamaanku xilgudashadiisa waxa uu ku salaynayaa Dastuurka iyo xeer-hoosaadyadiisa.

d.. Labada gole ee Baarlamaanku waxay yeelanayaan fadhiyo ay wadaagaan iyo kuwa gaar u kala ah, kuwa ay wadaagaan waxa ka mid ah:-

b- Dhegeysiga Warbixinta Madaxweynuhu ka jeediyo furitaanka labada gole midkood.

t- Marka laga doodayo ku biiridda Jamhuuriyadda Somaliland urur ama huwan goboleed ama caalami ah ama ansixinta heshiisyada leh dabeecad goboleed ama caalami.

x- Go'aaminta iyo ku-dhawaaqidida xaaladaha dagaal marka Jamhuuriyadda Somaliland la soo gudboonaado dagaal.

kh- Ka doodista dhowrsanaan ka-qaadida Madaxweynaha ama Madaxweyne-ku-xigeenka.

d- Doodaha ku saabsan aafuoyinka dabiiciga ah.

r- Doodaha la xidhiidha xeerarka degdegga ah.

s- Doodda lagu ansixiyo magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda sare. iyo

sh- Arrimaha kale ee 2da Gole la habboonaata in ay fadhi wadajir ah ka yeeshaan.

GOLAHA WAKIILADA

QODOBKA 19AAD

TILMAANTA GUUD EE GOLAHA

Golaha Wakiilladu waa xubno ka wakiil ah dadweynaha; waana qaybta laad ee xeer-dejinta dalka, ansixinta xeerarka, oggolaanshaha iyo ilaalinta siyaasadda guud ee hoggaaminta dalka.

QODOBKA 20AAD

TIRADA GOLAHA IYO DOORASHADIISA

Tirada Golaha Wakiillada, shuruudaha qofka isu-taagaya doorashada iyo qaabka cod-bixinta doorashada waxa qeexaya xeerka doorashooyinka.

QODOBKA 21AAD

MUDDADA XILKA IYO XILLIGA DOORASHADA

a.. Muddada xilka Golaha Wakiillada waa 5 (Shan) sano oo ka bilaabmaya maalinta maxkamadda sare ay dhaariso xubnaha.

b.. Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya doorashada Golaha cusub bil ka hor dhammaadka muddada golaha hore.

c.. Haddii doorashada Golaha Wakiilladu ku qabsoomi weydo duruufo adag awgeed, Golaha hore ayaa xilka sii haynaya inta ay ka dhamaanayso duruufuugaasi, lagana dooranayo gole cusub. Duruufaha adagi waa; dagaal baahsan, xasilooni darro gudaha ah, aafu dabiici ah oo culus sida dhul gariir, cudurrada faafa,

abaaro culus; waxaana qiimaynaya kana go'aan gaadhaya Golaha Guurtida ka dib marka Golaha xukuumaddu sidaa soo jeediyo.

QODOBKA 22AAD

XARUNTA GOLAHA WAKIILLADA

Xarunta Golaha Wakiilladu waa magaalo-madaxda.

QODOBKA 23AAD

ISUGU YEEDHIDDA GOLAHA CUSUB

a.. Golaha cusub waxa uu qabanayaa fadhigiisa ugu horreeya 30 (soddon) maalmood gudahood oo ka bilaabmayso maalinta lagu dhawaaqo go'aamada doorashada; waxaana isugu yeedhaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

b.. Haddii Madaxweynuhu isugu yeedhi waayo, Golaha ayaa u kulmaya iskii maalinta 45aad (Shan iyo Afartanaad) laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqo go'aamada doorasho.

c.. Golaha cusub waxa furaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo dhaarinaya xubnaha. Markaa waxaa guddoominaya shirka xubinta ugu da' weyn; waxaana goluhu iska dhex dooranayaa Guddoomiyaha iyo laba guddoomiye-ku-xigeen.

QODOBKA 24AAD

FADHIYADA GOLAHA WAKIILLADA

a.. Fadhiyada Golaha Wakiilladu waa kuwo furan, kuwo xidhana way noqon karaan; xeer hoosaad baana nidaaminaya.

b.. Fadhiga Golaha wakiilladu waxa uu ku furmi karaa marka ay joogaan kala badh in ka badani, marka laga reebo kuraasida bannaanshahooda la baahiyay.

c.. Go'aamada golaha waxa ay ku ansaxayaan hal dheeri xubnaha jooga fadhiga (aqlabiyad fudu), marka laga reebo xaaladaha dastuurku ama xeer hoosaadka goluhu uu u jideeyo aqlabiyad kale.

d.. Dib-u-dhigid fadhi wuxuu ku ansaxayaa aqlabiyad fudud (hal dheeri), waxaana dib loo dhigi karaa ugu badnaan toddoba (7) maalmood.

e.. Wasiirrada iyo Wasiir-ku-xigeennada waxa ku waajib ah in ay ka qayb-galaan fadhiyada Golaha Wakiillada iyo Guddiyadiisa haddii qoraal lagaga codsado sidaa; waxaanay xaq u leeyihiin in ay ka qayb-qaataan doodda; hase yeeshee xaq uma laha codayn. Sidoo kale, Madaxweynaha waxa u bannaan in uu u wakiisho ku-xigeenkiisa ama Wasiir kasta ka qayb-galka fadhiyada Golaha Wakiillada.

QODOBKA 25AAD

KAL-FADHIYADA IYO HABAYNTA GOLAHA WAKIILLADA

a.. Waxa Goluhu yeelanayaa 3 (Saddex) kal-fadhi oo caadi ah sannadkiiba oo qaadanaya muddo 28 (Siddeed iyo Labaatan) toddobaad ah. Labadii kal-fadhi waxa u dhaxaynaya ugu yaraan 4 (Afar) toddobaad, ugu badnaana 8 (Siddeed) toddobaad.

b.. Kal-fadhiga aan caadiga ahayn ee Golaah Wakiillada waxa uu ku qabsoomi karaa;

b) Codsii ka yimid Madaxweynaha;

t) Guddoomiyaha Golaha Wakiillada oo isugu yeedha;

j) 1/3 (Saddex-meelood, meel) tirada xubnaha wakiillada oo qoraal ku codsada.

c.. Kal-fadhigiisa ugu horreeya, waxa golaha weakiillada ku ansixinayaa xeer-hoosaadkiisa, waxaanu ku dhisanayaa guddi-hoosaadyo inta uu u baahdo.

d.. Khudbadda Qaranka waxa jeedinaya Madaxweynaha kal-fadhiga u horreeya sannadkii walba waxay ku warbixinaysaa siyaasadda guud ee dowladda iyo xaaladda guud ee dalka.

QODOBKA 25AAD

MUSHAHARKA IYO GUNNADA GOLAHA WAKIILLADA

Xubnaha Golaha Wakiilladu waxay yeelanayaan mushahar iyo gunno xeerku qeexo.

QODOBKA 27AAD

REEBBANAANTA QABASHADA XIL KALE IYO UGA FAA'IIDEYSIGA XILKA DANNO GAAR AH

Xubinta Golaha Wakiillada uma bannaana in ay qabato xil kale oo dowladeed, iyada oo xilkii loo doortay haysa; umana bannaana in ay uga faa'iideysato xilkaasi dano gaar ahaaneed.

QODOBKA 28AAD

DHAWRSANAANTA XUBINTA GOLAHA WAKIILLADA

a.. Xubinta Golaha Wakiillada loo qaban maayo, waxna loogu qadi maayo arrin uu ogaaday ama uu golaha soo hor-dhigay ama arrimo uu ra'yi ka dhiibtay.

b.. Waxaa ka reebban xukunkaas faqradda laad wixii cay ama aflagaado ah ee xubintu geysato.

c.. Ma bannaana in laga qaado xubinta Golaha Wakiillada tallaabo baadhitaan ama waraysi; ama qabasho ama xidhitaan ama tallaabo kale oo ciqaab la xidhiidha iyada oo oggolaansho looga helo Golaha Wakiillada mooyaane.

d.. Waxa xubinta tallaabo laga qaadi karaa haddii lagu qabto isaga oo dembi faraha kula jira; markaana waxa waajib ah in Golaha si degdeg ah loo ogeysiiyo.

e.. Golaha waxa ku waajib ah in uu hubiyo in tallaabada laga qaaday xubinta ay tahay mid toosan.

f.. Haddii aanu Goluhu fadhiyin, waxa waajib ah in tallaabada laga qaadayo xubinta laga kal-fadhiga xiga.

g.. Dacwadaha aan ciqaabta ahayn waa lagu oogi karaa xubinta Golaha Wakiillada, iyada oo aan oggolaanshahaas loo baahnayn.

QODOBKA 29AAD

WAAYIDDA XUBINIMADA GOLAHA WKAIILLADDA

Xubinnimada Golaha Wakiilada waxaa la waayi karaa haddii:

1.. Xubintu geeriyooto ama uu ku yimaad xanuun suurto-gelin waaya gudashada xilkeeda.

2.. Xubintu istiqaalad dhiibto, iskeedna shaqada uga tagto; goluhuna ka oggolaado;

3.. Uu jabo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay, ama uu gudan waayo xilkiisa;

4.. Uu ku dhaco xukun ciqaabeed kama dambays ah oo maxkamadda horteeda kaga caddaaday;

5.. Uu ka maqnaado 20 (Labaatan) fadhi oo isku xiga idin la'aan.

QODOBKA 30AAD

BUUXINTA JAGADA GOLAHA WKAIILLADA

Haddii ay bannaanaato jagada xubin ka mid ah Golaha wakiilada ka hor lixda bilood ee ugu dambeysa muddada xilka golaha, waxa loo soo buuxinayaa si waafaqsan xeerka, iyada oo xubinta cusubi ay dhamaystirayso muddada xilka golaha ka hadhay.

QODOBKA 31AAD

XOGHAYAHA GOLAHA WAKIILLADA IYO LA-TALIYAYAASL

a.. Golaha Wakiilladu wuxuu yeelanayaa Xoghayn uu madax ka yahay Xoghaye Guud oo aan ka tirsanayn Golaha Wakiillada; kana kaalmaynaya shir-guddoonka

Golaha; hawlaha xafiiska. Dhammaan arrimaha maaliyadda iyo maamulka, wuxuuna yeelanayaa ku-xigeen.

b.. Xoghayanta Golaha Wakiillada waxa ka mid ahaanaya la-taliye sharci oo buuxinaya shuruudaha Dastuurku u dhigay qofka garsoore ka noqon kara Maxkamadda Sare.

c.. Shaqalaaha kalee xoghaynta waxa shaqo-gelinaya Xoghayaha guud marka uu oggolaansho ka helo shir-guddoonka.

QODOBKA 32AAD

SOO BANDHIGIDA MASHRUUC SHARCI

Mashruuca-sharci waxa Golaha Wakiillada u soo bandhigi kara:

1.. Golaha Xukuumadda

2.. Tirada Xubnaha Golaha Wakiillada ah ee xeer-hoosaadka Goluhu qeexo.

3.. Muwaadiniin leh xaqa cod-bixinta, tiradooduna aanay ka yarayn 5000 (Shan kun) oo qof; waxaana ka reebban mashruuc qaanuun maaliyadeed.

QODOBKA 33AAD

Mashruuc sharci waxaa uu xeer ku noqonayaa ansixinta Golaha Wakiillada; waxaanu dhaqan-gelayaa ka dib marka uu Madaxweynuhu uu saxeexo.

QODOBKA 34AAD

AWOODDA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA WAKIILLADA

a.. Waxa waajib ah in uu oggolaansho Golaha Wakiillada ka helo qof kast aoo loo magacaabo Wasiir, iyo Madaxda Hay'adaha Dowladda, iyada oo la raacayo Dastuurka.

b.. Golaha Wakiilada waxa kale oo uu awood u leeyahay ka doodista, wax-ka-sheegidda iyo talo ku biirinta siyaasadda guud ee xukuumadda.

c.. Ku-soo-rogidda dalka, ama qayb ka mid ah xukun deg-deg ah, waxa golaha xukuumaddu uu weydiisanayaa labada gole (Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida) oggolaansho.

d.. Golaha Wakiilladu iyo Guddiyadiisu waxa uu awood u leeyahay in uu u yeedho xukuumadda ama hay'adaheeda iyo wakaaladaheeda, si ay wax uga weyddiidaan hawlahooda.

QODOBKA 35AAD

MIISAANIYADDA

a.. Miisaaniyada waxa ansixinaya Golaha Wakiillada.

b.. Haddii ansixinta Miisaaniyadda cusubi dhammaan weydo ka hor bilowga sannad maaliyadeedka cusub, waxa lagu dhaqmayaa miisaaniyaddii hore inta ay ka soo baxayso miisaaniyadda cusubi.

c.. Golaha Wakiillada ayaa oggolaanaya gelidda kharash ka baxsan Miisaaniyadda.

d.. Xeer ayaa caddaynaya habka soo diyaarinta Miisaaniyadda guud iyo sannad-maaliyadeedka.

e.. Xeer ayaa caddaynaya miisaaniyadda iyo xisaab-xidhka Hay'adaha, wakaaladaha iyo shariikadaha dowladeed ama kuwa ay wax ku leedahay iyo u soo bandhigidooda Golaha Wakiillada.

f.. Waa waajib u soo bandhigidda Golaha Wakiillada xisaab-xidhka Miisaaniyaddii guud ee dhammaatay muddo aan ka badnayn lix bilood oo ka bilaabanta taariikhda dhammaadka sannad-maaliyadeedka, iyada oo Golaha Wakiilladu ka dooday, go'aanna soo saarayaan.

g.. U soo bandhigidda xisaab-xidhka Miisaaniyadda waxa u xilsaaran Hantidhawraha guud.

QODOBKA 36AAD

SOO SAARIDDA, FAAFINTA IYO DHAQAN-GELINTA XEERKA

Xeerarku waxay dhaqan-gelayaan maalinta Madaxweynuhu saxeexo, baafinta rasmiga ahna waxa lagu soo saarayaa markay suuro-gasho.

XUBINTA 2AAD

GOLAHA GUURTIDA

QODOBKA 37AAD

TILMAANTA GUUD EE GOLAHA

Golaha Guurtida Jamhuuriyadda Somaliland oo ah Golaha Odayaasha, waa qaybta 2aad ee xeer-dejinta, waxaanu dib u eegaa xeerarka ka soo baxa Golaha Wakiillada intaan Madaxweynaha loo gudbin; wuxuuna gaar u leeyahay curinta xeerarka ku saabsan Diinta, Dhaqanka iyo Nabadgelyada.

QODOBKA 38AAD

DOORASHADA XUBNAHA GUURTIDA IYO MUDDADA XILKA

a.. Xubnaha Golaha Guurtida waxaa lagu soo dooranayaa doorasho; habka doorashada iyo shuruudaha qofka la soo dooranayo waxaa qeexaya xeerka doorashooyinka.

b.. Muddada xilka Golaha Guurtidu waa lix (6) sano, oo ka bilaabmaysa maalinta fadhiga koowaad qabsoomo.

QODOBKA 39AAD

TIRADA GOLAHA GUURTIDA

1. Tirada xubnaha golaha Guurtidu waa 60,000 oo iska dhex dooranaya guddoomiye, laba guddoomiye-ku-xigeen iyo guddi hoosaadyo inta u baahdo. Goluhu wuxuu yeelanayaa guddi joogta ah oo 15 (shan iyo toban) xubnood ah.

QODDOBKA 40AAD

XOGHAYAHA GOLAHA IYO LA-TALIYAYAAL

Golaha guurtidu waxa uu yeelanayaa xoghayaha aan xubin ka ahayn golaha. Waxa kale oo uu yeelan karaa la-taliyayaal uu ka mid yahay la-taliye sharci. Dhismaha xoghaynta golaha guurtida waxay la mid tahay ta golaha wakiillada.

Qodobka 41aad

Fadhiga ugu horreeya ee golaha guurtida

Fadhiga ugu horreeya ee golaha guurtidu wuxuu qabsoomayaa 30 (soddon) maalmood gudahood ka mid maalinta la soo dhamaystiro doorashada; waxaana furaya oo dhaarinaya guddoomiyaha maxkamada sare, waxaana shirkaas guddoominaya xubinta ugu da'weyn inta laga dooranayo guddoomiye rasmi ah iyo labadiisa ku xigeen.

QODOBKA 42AAD

XEER-HOOSAADKA GOLAHA

kal-fadhigiisa ugu horreeya, golaha guurtida waxa uu ku ansixinayaa xeer-hoosaadka golaha.

QODOBKA 43AAD

AWOODA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA GUURTIDA

1.. Curinta xeerarka ku saabsan diinta, dhaqanka, iyo nabadgelyada.

2.. Dib-u-eegidda xeerarka golaha wakiiladu ansixiyo xeerka maaliyadda mooyaane, waxaaanu ku celin karaa golaha wakiillada hal mar, muddo 30 (soddon) maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta loo soo gudbiyo xafiiska shir-guddoonka golaha guurtida, isagoo sababaha aragtidiisa qoraal ahaan ugu gudbinaya.

3.. Ka-talo-bixinta dhaliilaha maamul ee xukuumadda iyo ogaysiintooda golaha wakiillada.

4.. Ka-gacan-siinta xukuumadda arrimaha la xidhiidha diinta, nabadgelyada, difaaca, dhaqanka, dhaqaalaha iyo bulshada; iyagoo kaashanaya madax-dhaqmeedka beelaha.

5.. U yeedhidda xubnaha xukuumadda iyo wax-ka-weydiinta hawshooda.

6.. Waxa kaloo golaha guurtidu awood u leeyahay inuu golaha wakiiladda u gudbiyo soo jeedin mashruuc-xeer, si golaha wakiiladu uga doodo, go'aaana uga gaadho.

QODOBKA 44AAD

mushaharka iyo gunnada golaha guurtida

xubnaha golaha guurtidu waxay yeelanayaan musharahaar iyo gunno xeerku qeexo.

QODOBKA 45AAD

DHAWRSANAANTA XUBINTA GOLAHA GUURTIDA

Dhawsanaanta xubinta golaha guurtidu waxa ay la mid tahay ta xubinta golaha wakiillada iyadoo dhawsanaan-ka-qqaadista uu leeyahay golaha guurtidu.

Qodobka 46aad

shaqo-ka-teigidda xubinta golaha guurtida

Xubinta golaha guurtidu waxa ay u gudbin kartaa shaqo-ka-tegideeda shir-guddoonka, isagaana ka oggolaanaya kana diidi kara.

QODOBKA 47AAD

WAAYIDA XUBINNIMADA GOLAHA GUURTIDA

1.. xubinta golaha guurtidu waxa ay waayi kartaa xubinnimadeeda haddii ay burto sshuruur ka mid ah shuruudihii lagu soso doortay, ama uu gudan waayo xilka sida uu u caddaynayo xeer-hoosaadka golaha guurtidu.

2.. Haddii uu ku dhaco xukun ciqaabeed oo kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga caddaaday.

3.. Haddii goluhu ka aqbqalo istigaalad.

QODOBKA 48AAD

reebnaanta qabasho xil kale iyo uga faa'iidaysiga xilka dano gaar ah

Xubinta golaha guurtida uma banaana in ay qabato xil kale oo dawladeed iyada oo xilkii loo doortay haysa; umana banaana inay xilka uga faa'iidaysato dano gaar ahaaneed.

QODOBKA 49AAD

FADHIYADA IYO KAL-FADHIYADA

Fadhiyada golaha guurtida waa kuwo furan; waxaana ay noqon karaan kuwo xidhan xeer-hoosaadka ayaana caddayndoona. Tirada ay fadhiyadu ku furmi karaan; aqlabiyadda ay go'aamadiisu ku ansaxayaana; iyo cidda isugu yeedhi karta kal-fadhiyada aan caadi ahayn, waxay la mid yihiin habka golaha wakiillada.

QODOBKA 50AAD

BANNAANAANSHAHA JAGADA GOLAHA

GUURTIDA IYO SOO BUUXINTEEDA

1. Jagada golaha guurtidu waxay ku bannaanaanaysaa haddii ay timaado xaalad ka id ah xaaladaha ku tilmaaman qodobka 47aad.

2. Haddii ay banaanaato jagada xubin ka mid ah golaha guurtidu ka hor lixda bilood ee ugu dambeeya muddada xilka golaha guurtida, waxa loo soo buuxinayaa si waafaqsan xeerka doorashooyinka, iyadoo xubinta cusubi ay dhamaystirayso muddada xilka golaha.

QODOBKA 51AAD

HABKA LOO RAACO XEER-DEJINTA

1. Labada gole ee baarlamaanka, mid waliba mashruuc-sharci ee uu ansixiyo wuxuu u gudbinayaa golaha kale; si uu ula eego, talooyinna uga siiyo.

2. Labada gole, mid waliba golaha kale, hal mar oo keliya ayuu mashruuc-sharcri ku soo celin karaa.

3. Xeer-hoosaadyada baarlamaanka ayaa qeexaya hab-socodka mashruuc sharci, waana in uu muujiyaa mudnaanta gaar ah ee ay leeyihiin mashruuc-sharciyada la xidhiidha maaliyadsda iyo kuwa xukuumaddu u aragto deg-deg, kuwaas soo mudan in iyaga la hormariyo.

4. Mashruuc-sharci ay labada gole ee baarlamaanku ku wada ansixiyeen ama ku wada oggolaadeen aqlabiyadda 2/3 (saddex meelood, laba) ama ka badan madaxweynuhu dib uma celin karo ee wuu saxeexayaa. Haddiise uu arko in mashruuc-sharcigaasi ka hor imanayo godob ama godobo dastuurka, waa inuu sidaa ku wargeliyaa shir-guddoonka iyo xeer-ilaaliyaha guud oo u gudbin doona maxkamadda dastuuriga ah.

5. Madaxweynuhu mashruuc-sharci looga soo gudbiyay baarlamaanka, wuxuu ku saxeexayaa saddex toddobaad gudahood, laga bilaabo taariikhda mashruucaas-sharci soo gaadhay xafiiska madaxweynaha haddii aanu baarlamaanka dib ugu soo celin.

6. Haddiise madaxweynuhu mashruuc-sharci uu u soo gudbiyay baarlamaanku ku saxeexi waayo muddadaas la gooyay ama ku soo celin waayo baarlamaanka, mashruuc-sharcigaasi si toos ah ayuu u noqonayaa xeer.

QODOBKA 52

1. Mashruuc-sharci kasta aan ahayn kuwa maaliyadda oo golaha wakiiladu aqlabiyad ku oggolaado waa in loo gudbiyo golaha guurtida, kaas oo markaas:-

b. Oggolaan karaama wax ka beddel soo jeedin kara

t. Haddii golaha guurtidu oggolaan waayo, ama wax-ka-beddelid uu u soo jeediyay golaha wakiiladu ku qanci waayo, golaha wakiiladu wuxuu xaq u leeyahay in mashruuc-sharcigu kalfadhiga xiga ee golaha guurtida dib ugu celiyo.

Haddii uu golaha guurtidu oggolaan waayo ama ku soo jawaabi waayo bil gudaheed mashruuc-sharcigu wuu ansaxayaa, sidaas ayaana madaxweynaha looga gudbinayaa.

2. Mashruuc-sharci kasta uu golaha guurtidu aqlabiyad ku oggolaaday waa in loo gudbiyo glaha wakiillada, kaas oo markaa:-

b. Oggoalaan kara ama wax-ka-beddelid soo jeedin kara

t. Haddii golaha wakiiladu mashruuc-sharcigaas oggolaan waayo, ku noqosho ma laha.

3. Mashruuc-sharci labada gole soo oggolaadeen ee loo gudbiyay madaxweynaha, haddii uu sidaa ku oggolaado, wuxuu madaxweynuhu ku soo saarayaa faafinta rasmiga ah markay suuro gasho. Haddiise uu madaxweynuhu oggolaan waayo ama wax-ka-beddelid ssoo jeediyo waa inuu (21) maalmood gudahood ku soo war gelyo shir-guddoonka golaha wakiillada sababta uu u cuskaday.

4. Haddii uu sababaha uu madaxweynuhu cuskaday goluhu ku qanci waayo, oo mashruuc-sharcigaas uu mar labaad ku ansixiyo aqlabiyad 2/3 (saddex-meelood, laba) xubnaha golaha, mashruuc-sharcigaas waa inuu madaxweynuhu aqbalaa. Haddiise aqlabiyaddu intaas ka yaraato, mashruuc sharcigaasi wuu burayaa.

5. Mashruuc-shari uu golaha wakiiladu oggolaado aan ahayn mashruuc-sharci maaliyadeed oo golaha guurtidu nuxurkiisa (principle) ku diido aqlabiyad saddex

meeloodoo laba meelood xubnaha golaha, haddii golaha wakiiladu ku qanci waayo diidmadaasi oo mar labaad ansixiyo, mashruuc sharcigaasi wuu fulayaa.

QODOBKA 53AAD

XARUNTA GOLAHA GUURTIDA

Xarunta golaha guurtidu waa magaalo madaxda.

Qodobka 54aad

Eedayta xubnaha golayaasha

1. Xubnaha golayaasha (wakiillada iyo guurtida) waxa lagu oogi karaa dacwad dembi ah haddii la qabto xubinta ama xubnaha iyagoo faraha kula jira fal-dembiyeedkii (flagrante delicto), dembigaas oo ciqaabtiissu ugu yari tahay saddex (3) sano oo xadhig ah.

2. Dacwada dembiga ah ee lagu eedaynayo xubnaha golayaasha waxa soo oogaya xeer ilaaliyaha guud, ka bacdi marka golaha xubintu ama xubnuhu ka tirsanayeen ay maamuusska kaga xayubiyaan saddex meelood laba ahaan tirada guud ee golaha.

Waxa dacwadaass dhegaysigeeda awood u leh maxkamadda sare ee garsoorka (high court of justice).

Qaybta saddexaad

Waaxda Fulinta

Xubinta laad

Qoddobka 55aad

madaxweynaha & ku-xigeenka

Qaranku wuxuu yeelanayaa waaxda fulinta, oo ka gaar ah kana madax bannaan waaxyaha xeer-dejinta iyo garsoorka.

Qodobka 56aad

Waaxda fulintu waxa weeye:-

- Madaxweyne;
- Madaxweyne-ku-xigeen;
- iyo golaha wasiirada ee madaxweunuhu dhiso

Qodobka 57aad

Madaxweynuhu wuxuu xilkiisa u fulin doonaa si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka kale.

Qoddobka 58aad

Shuruudaha gofka loo dooranayo madaxweyne ama madaxweyne-ku-xigeen

Waxaa madaxweyne ama ku-xigeen madaxweyne loo dooran karaa gofka buuxiya shuruudaha soo socda:-

1.. waa in uu yahay muwaadin u dhashay Somaliland, oo muwaadinimo dowlad kalena haysan.

2.. Waa inuu Muslim yahay.

3.. Waa in aanay da'diisu ka yaraan 40 jir (40 sano).

4.. Waa inuu jidh ahaan iyo maskax ahaanba gudan karaa xilkiisa.

5.. Waa inuu aqoon iyo waayo-aragnimo u leeyahay arrimaha maamulka iyo hoggaaminta bulshada.

6.. Waa in aanuy dembi maxkamadi ku xukunta ka gelin Qaranka iyo hoggaaminta bulshada.

7.. Waa in aanu dembi maxkamadi ku xukuntta ka gelin Qaranka Somaliland.

8.. Waa inuu xog-ogaal u ahaado xaqaa'iga dalka ka jira, isaga oo joogay ugu yaraan labo sano ka hor taariikhda doorashada loo cayimay inay qabsoonto.

9.. Waa inuu hantidiisa diiwaan geliyo.

Qodobka 59aad

Habka doorashada

1. Waxaa madaxweynaha iyo ku-xigeenka lagu dooranayaa qaabka doorashada guud oo toos ah; isla markaana qarsoodi ah iyaga oo isku lammaan.

2. Doorashada madaxweynaha iyo ku-xigeenka madaxweynaha, oo isku mar loo codaynayo, kuna salaysan habka u codaynta liistada, waxaa la qaban doonaa bil ka hor dhamaadka muddada xilka madaxweynaha hore.

3. Madaxweynaha iyo madaxweyne-ku-xigeenka hore ayaa sii wadi doona hawlaha ay u xil-saarayeen ilaa madaxweynaha iyo ku-xigeenka cusubi kala wareegaan xilka muddo bil ah gudaheed.

4. Waxa loo aqoonsanayaa inay doorashada madaxweynenimada iyo ku-xigeenka ku guulaysteen labada qof ee magacyadoodu ku sheegan yihiin liistada hesha codadka ugu tirada badan.

5. Haddii ay suurtoobi waydo, duruufo la xidhiidha nabadgelyada darteed, in la qabto doorashada madaxweynaha iyo ku-xigeenka madaxweynaha marka mudadii xilkoodu dhammaato, waxaa Baarlamaankoo wada jira ah (fadhi) waajib ku ah inay muddada xilka u kordhiyaan madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa, iyaga oo tixgelinaya muddada dhibaataada lagaga gudbi karo; doorshaduna ku qabsoomi karto.

Qodobka 60aad

Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa waxa lagu dhaarinayaa ka hor intaanay xilka la wareegin, xaflad ay goobjoog ka yihiin shir-guddoonka baarlamaanka (wakiillada iyo guurtida) iyo xubnaha maxkamadda sare.

Qodobka 61aad

waxyaabaha ka reeban madaxweynaha iyo

madaxweyne-ku xigeenkiisa

1. Uma bannaana madaxweynaha iyo madaxweyne-ku-xigeenkiisa iyo marwooyinkooduba inay galaaan ganacsi muddada ay xilka hayaan.

2. Madaxweynuhu dalka kama maqaan karo (30) cisho oo isku xiga muddo ka badan, sabab caafimaad mooyaane.

3. Haddiyadaha la siiyo madaxweynaha iyo ku-xigeenka madaxweynaha, iyo marwooyinkooda; iyada oo lagu maamuusayo xilka ay hayaan waxa weeye hanti Qaran.

Qodobka 62aad

Habka uu madaxweynuhu xilka uga tegi karo

1. Madaxweynaha ama madaxweyne-ku-xigeenka waxa qoraal xil-ka-tegis ah uu u gudbin karaa goddooimiyaha wakiillada iyo guddoomihaha golaha guurtida; waxaana labada gole, fadhi wada jir ah, ku oggolaan karaan ama ku diidi karaan aqlabiyad tirada guud ah.

2. Haddiiba ay golayaashu diidaan cidsiga xil-ka-tegidda ee ku sheegan faqrada (1) ee qodobkan waxa madaxweynaha ama madaxweyne-ku-xigeenku xaq u yeelayanaan in uu mar labaad keensado dalabka xil-ka-tegis ah muddo aan ka badnayn saddex bilood markii uu codsiga hore qortay; waxaana waajib ku ah labada gole inay xil-ka-tegidda ka oggolaadaan.

Qoddobka 63aad

Mushaharka & gunnada

Mushaharka, gunnada, iyo hantida dawladda, ee ay madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisu ku dhaqmaan waxa qeexaya xeer.

Qodobka 64aad

1. Mudada xilka ee madaxweynaha iyo ku-xigeenka madaxweynaha waa 5 sano oo ka bilaabanta maalinta xilka loo dhaariyo.
2. Qofna jagada madaxweynaha ma qaban karo laba jeer wax ka badan.

Qodobka 65aad

bannaanaanta jagada

waxaaa jagada madaxweynaha ama ku-xigeenka madaxweynuhu bannaanaan kartaa haddii ay dhacdo xaalad ka mid ah xaaladaha hoo ku sheegan:

- b. Is casilaad (xil-ka tegid)
- t. Xukun dembi ah oo xilka lagaga xayuubiyay
- j. Hawshii oo uu caafimaad-darro darteed u gudan kari waayay
- x. Geeri ku timaada.

Qodobka 66aad

habka buuxinta jagada bannaanaatay

1. Haddii mid ka mid ah xaaladaha ku sheegan Qod. 65aad ay ku timaado madaxweynaha saddexda sano ee u horaysa shanta sano ee xilka loogu doortay, waxa madaxweyne-ku-xigeenku noqonayaa madaxweyne ku-meel-gaadha, waxaana madaxweyne lagu dooranayaa muddo lix bilood gudahood ah.

1.1 Haddii ay madaxweynaha xaaladaha ku sheegan Qod. 65aad ay ku timaado labada sano ee u dambeeya muddada shanta sano ee loo doortay, waxa xilka madaxweynenimo la wareegaya madaxweyne-ku-xigeenka mudada labada sano ee hadhay, waxaana madaxweyne-ku-xigeen u sharixi doonaa xubin ka tirsan golaha wakiillada, waxaana ansixinaya labda gole oo wada jira.

2. Sidoo kale, marka xaalad ka mid ah xaaladaha ku sheegan qodobka 113aad ay ku timaado madaxweyne-ku-xigeen wuxuu madaxweynuhu u magacaabayaa madaxweyne-ku-xigeen xubin ka tirsan golaha wakiillada, oo 2da gole oggolaadeen. Wuxuuna mudanaha xilka loo sharaxayaa hayn doonaa jagadaas muddada xilka ka hadhay, iyada oo ay bannaanaan doonto jagadii wakiilnimadu. Haddiiba ay golayaashu diidaan mudanaha madaxweynuhu u sharaxay madaxweyne-ku-xigeenka waxaa waajib ku ah inuu mudane kale ku magacaabo muddo aan ka badnayn 30 maalmood gudahood oo ka bilaabmayssa taariikhda diidmada golayaasha.

3. Haddiiba ay madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa isku hal mark ku timaado xaalad ka mid ah xaaladaha ku sheegan qodobka 65aad waxaa xilka madaxweynaha, si ku meel gaadha, u haynaya guddoomiyaha golaha guurtida. Waxaana doorashada madaxweynaha iyo ku-xigeenka lagu qaban doonaa muddo (60) maalmood gudahood ah, oo ka bilaabmayssa maalinta ay xaaladdu sugnaatay.

Xubinta 2aad

qodobka 67aad

Awoodaha madaxweynaha

Madaxweynuhu waa madaxa Qaranka iyo dawladda; waana astaanta midnimada muwaadiniinta ka tirsan Jamhuuriyadda Somaliland. Waxa uu u xil-saaran yahay daryeelka haybadda dalka; ilaalinta nabadgelyada; horumarinta bulshada iyo hab-sami-u-socodiintta maamulka dawladda. Si uu u gudan karo xilalka kor ku sheegan, wuxuu madaxweynuhu leeyahay awoodaha soo socda:

1. Hoggaaminta siyaasadda guud ee xukuumadda.
2. Magacaabidda iyo xil-ka-wareejinta xubnaha golaha wasiiradaa.
3. Magacaabidda iyo xil-ka-warreejinta madaxda sare ee dawladda marka uu la tashado wasiirka ku shaqda leh; isla markasana tixgeliyo dastuurka iyo xeerarka u gaarka ah. Waxaa madaxda sare ee dawladda loola jeedaa:
 - b. Hanti-dhowraha guud
 - t. Guddoomiyaha baanka dhexe
 - j. Guddoomihaha iyo guddiga hay'adda shaqaalaha dawladda
 - x. Xisaabiyaha guud
 - kh. Agaasimayaasha guud ee wasaaradaha iyo hay'adaha
 - d. Taliyayaasha ciidamda iyo ku-xigeenadooda
 - r. Danjirayaasha
 - s. Xeer-ilaaliyaha guud; iyo
 - dh. Saraakiisha sare ee kale ee xeer ka soo baxay golayaasha xeer-dejintu awood u siinayo magacaabistooda iyo xil-ka-wareejintooda.
4. Hoggaaminta ciidamada Qaranka maadaama uu yahay taliyaha guud (commander-in-chief).
5. Oggolaanshaha cafiska, iyo saamaxaadda, oo ay ka reeban yihiin in qisaasta iyo xuduudda shareecada Islaamka; iyo bixinta magangelyada siyaasadeed, ka dib marka uu la tashado hay'adaha ku shaqada leh.
6. Saxeexa heshiisyada caalamiga ah.
7. Ka qayb-gelidda shirarka caalamiga ah, isagoo ka wakiil ah Jamhuuriyadda Somaliland.
8. Qaabilaadda diblomaasiyiinta shisheeyaha iyo ka qabashada waraaqaha aqoonsigooda (credentials).
9. Magacaabidda danjirayaasha u jooga Jamhuuriyadda Somaliland dalalka shisheeyaha ah, ururada caalamiga ah iyo kuwa gobollada ee adduunka.
10. Bixinta astaamaha xurmo iyo sharaf ee ay ka mid yihiin billadaha.

11. Hoggaaminta xaaladaha dagaalka; isla markaana ku dhawaaqidda xaalad deg deg ah.

12. Fulinta xeerarka aan waaxda garsoorka awoodaheeda hoos iman; iyo

13. Awoodaha kale ee ku xusan xeerarka dalka.

Qodobka 68aad

Awoodaha madaxweyne-ku-xigeenka

Madaxweyne-ku-xigeenka qaranku wuxuu awood u leeyahay:

1. Ku-simida xilka madaxweynaha marka uu madaxweynuhu maqan yahay ama uu buko.

2. Gudashada hawlaha uu madaxweynuhu u egmado.

3. Qabashada xilka madaxweynenimo marka ay jagadu bannaanaato sida ku xusan qodobka 66aad xilka uu la wareegayaana waxa uu noqonayaa sida ku xusan qodobada 65aad iyo 66aad.

Qodobka 69aad

Awoodaha kale ee madaxweyne ee la xidhiidha xeerarka degdegga ah

Marka ay soo if-baxaan xaalado gaar ah oo halis gelin kara nabadgelyada dalka; khatar ku noqon kara xeerka iyo nidaamka; khalkhal ku abuuri kara xasiloonida guud; ama kalsoonida dhaqaale, iyada oo aan golaha wakiiladu fadhi lahayn, ama haddiiba uu fadhiyo aanu awoodi karayn qaadashada go'aan gaadhis deg-deg ah, sida ay ugu muuqato madaxweynaha inay ku habboon tahay; waxaa madaxweynuhu soo saarayaa xeerar degdeg ah, oo loogu talo galay in lagu joojiyo khataraha kor ku sheegan.

Waxaa waajib ah in fadhiga ugu horreeya la horgeeyo Baarlamaanka oo uu ku ansixiyo aqlabiyad fudud (simple majority). Xeerarkaasi degdeg ahi wuxuu ku koobnaan karaa gobol iyo gobollo kaasa, wuxuuna noqon karaa mid caam ah oo dalkoo dhan saameeya.

Qodobka 70aad

Hab maamuuska madaxda sare

1. Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa ayaa leh hab maamuuska koowaad ee Qaranka.

2. Guddoomiyayaasha labda gole ayaa leh hab-maamuuska labaad ee Qaranka.

3. Guddoomiyaha maxkamadda sare ayaa leh hab-maamuuska saddexaad ee Qaranka.

Xubinta 3aad

Qodobka 71aad

Golaha Wasiirada

1.. Golaha wasiiradu waxay madaxweynaha ka kaalmaynayaan fulintta xilkiisa iyaga oo wadajir ugala ttalin doona siyaasadda guud ee dawladda.

2.. Waxaa wasiirada iyo wasiir-ku-xigeenada magacaabi kara ama xilka ka qaadi kara madaxweynaha; waxaana magacaabidda wasiirada la hor dhigayaa golaha wakiillada oo ay fadhigaas joogaan kala badh iyo hal xubnood, oo ku oggolaan kara ama ku diidi kara cod hal dheeri ah (simple majority) oo gacan taag ah.

3.. Soddon (30) maalmood gudahood marka golaha wakiiladu ansixiyaan magacaabidda wasiirada, waxaa xilka u dhaarinaya guddoomiyaha maxkamada sare iyada oo uu goob joog yahay madaxweynaha.

4.. Wasiirada ama wasiir-ku-xigeenadu ma qaban karaan shaqo kale oo ka baxsan tan xukuumadda.

5.. Qofna looma magacaabi karo wasiir ama wasiir-ku-xigeen haddii aanu buuxin shuruudaha ku xidhan qofka loo dooranayo golaha wakiillada ee ku qeexan xeerka doorashooyinka.

6.. Wasiirka waxa loo xil-saari karaa hal wasaarad oo qudha, ku-sime wuu ka noqon karaa si ku-meel-gaadha ah wasaarad uu wasiirkeedii ka maqan yahay.

7.. Madaxweynaha ayaa guddoomin doona fadhiyada golaha wasiirada ee caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn, isagoo u giman kara madaxweyne-ku-xigeenka markii loo baahdo.

8.. Lama xidhi karo wasiir ama wasiir-ku-xigeen haddii aan lagu qaban siagoo faraha kula jira demibi ciqabtiisu gaadhayso saddex sano ama aanu madaxweynuhu ka qaadin dhowrsanaanta, isaga oo ku qancay soo jeedin uu u soo bandhigay xeer-ilaaliyaha guud.

Qodobka 72aad

Sii haynta xilka

1. Wasiirka ama wasiir-ku-xigeenka istiqaalad dhiiba ama xilka laga fadhiisiyo isaga ayaa xilka sii haynaya inta bedelkiisu ka tirsanayo.

Waxa ka reeban, muddada uu wasiirku ama wasiir-ku-xigeenku sugayo, in xilka laga tiriyo, inuu cid xil u magacaabo heshiis magaca wasaaradda cid kale kula galo.

Qodobka 73aad

Eedaynta iyo maamuus-ka-xayuubinta

madaxweynaha, ku-xigeenkiisa iyo wasiirada

Hadii madaxweynaha iyo ku-xigeenka lagu soo oogo dembiyada kala ah:

b. Khiyaamo Qaran (high treason); ama

t. Ku-xad-gudub dastuurka

1. Waxa ku soo oogi kara madaxweynaha ama/iyo madaxweyne-ku-xigeenkiisa demiyada ku xusan faqrada laad ee qodobkan ugu yaraan saddex meelood meel xubnaha ka tirsan golaha wakiillada; iyagoo eedaynta u gudbin doona guddoomiyaha golaha wakiillada, golaha wakiiladduna waxa uu ku ansixin karaa cod xubnaha wakiillada bandhkii iyo mid ah (absolute majority).

2. Golaha wakiiladu wuxuu u igmanayaa guddi aan 10 xubnood ka badnayn oo eedaynta kaga oogta madaxweynaha golaha guurtida horteeda.

3. Waxa u fadhiisanaya xukunka eedayntaas golaha guurtida oo uu guddoomiye ka yahay guddoomiyaha maxkamada sare, oo dhegaysanaya dacwada ay soo oogayaan guddiyada ay igmatay golaha wakiiladu iyagoo madaxweyne ama madaxweyne-ku-xigeenku uu isaguna yeelanayo qareeno gaara oo difaaca. Golaha guurtidu wuxuu ku ansixin karaa eedayntaas cod 2/3 (saddex meelood laba meelood oo tirada guud ee golaha ah).

3. Haddii xeer ilaaliyaha guud ku soo eedeeyo wasiir ama wasiir-ku-xigeen dembi ka mid ah dembiyadda ku sheegan faqrada koowaad ee qodobkan, waxaa war-bixinta eedda uu xeer ilaaliyaha guud u gudbin doonaa madaxweynaha. Haddii madaxweynuhu ku qanco warbixinta xeer ilaaliyaha guud, waxa uu wasiir ama wasiir-ku-xigeenka ka xayubin doonaa dhawrsanaanta. Haddii uu ku qanci waayo madaxweynuhu war-bixinta xeer ilaaliyaha guud, wuxuu amrayaa inuu xeer-ilaaliyaha guud la noqdo dacwadiisa.

4. Waxa eedda la xidhiidha wasiirada qaadi doonta maxkamadda sare ee garsoorka (high court of justice); maxkamadaas oo ka koobn guddoomiyaha maxkamadda sare, afar garssoore oo ka tirsan maxkamadda sare iyo afar xubnood oo ka tirsan golayaasha (wakiillada iyo guurtida), oo gole waliba soo doorto laba xubnood.

Qaybta afaraad

Xubinta laad

waaxda garsoorka

qodobka 74aad

1. Waxa qaranku yeelanayaa waax garsoor, oo hawsheedu tahay u garnaqa dawladda iyo dadka iyo dadka dhexdooda.

2. Waaxda garsoorku waxay hawlaheeda u fulinaysaa si dastuurka waafaqsan, iyada oo ka madax-bannaan waaxyaha kale ee Qaranka.

Qodobka 75aad

1. Garsoorku waxa uu awood gaar ah u leeyahay:

b. In uu fasiro micnaha godobada dastuurka, xeerarka ka soo baxa golayaasha dastuuriga ah iyo xeerarka degdegga ah

t. Inuu ka garsooro khilaafka ka dhex abuurma laamaha dawladda oo dhinac ah iyo xubno ka tirsan dadweynaha oo dhinac ah.

J. inuu ka taliyo muran kasta oo la xidhiidha waafaqsanaanta dastuurka.

2. Ma bannaana in garsooruhu qabto shaqo kale inta uu hayo xilka garsoorka.

3. Daryeelka ku habboon garsoorayaasha xeer baa nidaaminaya

Qodobka 76aad

dhismaha garsoorka

1. Hay'addaha garsoorku waxay ka kooban yihiin maxkamaddaha, xeer-ilaalinta iyo guddiga caddaalada.

2. Garsoorayaasha maxkamadaha iyo xeer-ilaaliyaashoodu waxay u madax-banaan yihiin hawshooda garsoor iyaga oo raacaya xeerka oo keliya.

Qodobka 77aad

maxkamadaha

maxkamadaha Jamhuuriyadda Somaliland waxay ka kooban yihiin:

1. Maxkamadda sare
2. Maxkamaddaha racfaanka
3. Maxkamadaha gobolada
4. Maxkamaddaha degmoyinka iyo
5. Maxkamadaha ciidamada Qaranka.

Qodobka 78aad

maxkamada sare

Maxkamadda sare waa maxkamadda ugu saraysa garsoorka, isla markaana waxay tahay maxkamadda dastuurka. Tirada garsoorayaashu waa in aanay ka yaraan guddoomiyaha iyo far garsoore; waxaana nidaaminaya xeer gaar ah.

Qodobka 79aad

Maxkamadaha hoose

Magacaabidda garsoorayaasha iyo habka shaqada maxkamadaha hoose (maxkamadaha racfaanka, gobollada iyo degmooyinka), waxaa nidaaminaya xeer gaar ah.

Qodobka 80aad

Xeer-ilaalinta

Xeer-ilaalinta guud ee qaranku waxay ka kooban tahay Xeer-ilaaliyaha guud iyo ku-xigeenadiisa.

Qodobka 81aad

maxkamaddaha ciidamada iyo xeer-ilaalintooda

1. Maxkamadaha ciidamadu waxay gaar u yihiin dhegaysiga dembiyada ciqaabta ee lagu oogo xubnaha ciidamada Qaranka xaaladdaha nabadda iyo dagaalka.

2. Maxkamadaha ciidamada iyo xeer-ilaalintooda waxa nidaaminaya xeerar gaar ah.

Qodobka 82aad

magacaabidda gudoomiyaha maxkamadda sare iyo garsoorayaasha maxkamadda sare

1. Madaxweynuhu, isaga oo la tashanaya guddiga caddaalada, waxa uu magacaabayaa gudoomiyaha maxkamadda sare iyo garsoorayaasha maxkamada sare, iyada oo la tixgelinayo; heerka waxbarasho, waayo-aragnimo xirfadeed iyo suubanaan akhlaaqeed. Magacaabida gudoomiyaha maxkamadda sare waxa ansixinaya golayaasha (wakiillada iyo guurtida) oo fadhi wada jir ah yeesha muddo aan ka badnayn (3) bilood marka laga bilaabo taariikhda magacawga.

2. Ma banaana in loo magacaabo xilka gudoomiyaha maxkamada sare qof aan buuxin shuruudaha hoos ku sheegan:

b. Waa inuu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Somaliland.

t. Waa inuu haystaa shahaado jaamacadeed oo barasho sharciga ah, kana qalin jeebiyay jaamicad ay aqoonsan tahay wasaaradda waxbarashada jamhuuriyadda Somaliland.

j. Waa inuu leeyahay waayo-aragnomo xirfadeed oo aan ka yaran shan sano; kuna soo shaqeeyay garsoore ama/iyo xeer-ilaaliye ama/iyo qareen ama/iyo macallin jaamicad ka bara sharciga.

3. Madaxweynuhu xilka wuu ka qaadi karaa gudoomiyaha maxkamadda sare iyo garsoorayaasha maxkamada sare, isaga oo u baahan oggolaanshaha golaha wakiillada.

Qodobka 83aad

guddiga caddaalada

1. guddiga caddaaladda: Waa hay'adda hoggamisa maamulka garsoorka waxyna ka kooban tahay:

- Wasiirka wasaaradda caddaalada Guddoomiye
- Xeer ilaaliyaha guud Xubin
- Guddoomiyaha hay'adda shaqaalaha
- Laba xubnood oo golaha wakiiladu labadii sanoba hal mar ka soo doorto dadweynaha, kana kala tirsan aqoonyahanadda
- laba xubnood oo golaha guurtiduu ka soo doorto labadii sanoba hal mar dadweynaha, kana kala tirsan dhaqan-yaqaanada iyo culumaa'udiinka.

2. Waxa fadhiga guddigu ku ansixi karaa marka ay joogaan kala-badh in ka badan tirada guud ee xubnaha guddigu ka kooban yahay, waxayna ku go'aan qaadan karaan hal dheeri.

3. Guddiga caddaaladu iyaga ayaa iska dhex dooranaya xoghayn

Qodobka 84aad

1. Guddiga caddaaladu waxay u xil saaran tahay talo-ka-bixinta shaqo-siinta, xil-ka-qaadida, dallacsiinta, hoos-u dhigida, beddelaada, anshaxmarinta maxkamdaha hoose, rafcaanka, madaxda gobolada iyo degmooyinka iyo ku xigeenada xeer ilaaliyaha guud, ansixinta xubnaha xeer beegtida, shaqaalaha kale ee ka shaqeeya garsoorka waxay hoos imanayaan xeerka shaqaalaha.

2. Lama xidhi karo garsoore ama ku-xigeen xeer-ilaaliye guud hadii aanay guddiga caddaaladu oggolaanin; hase yeshee, looma baahna oggolaanshaha guddiga haddii garsooraha ama ku-xigeenka xeer-ilaaliyaha guud la qabto isaga oo faraha kula jira (flagrante Delicto) dembi ciqaabtiisa ugu yari tahay saddex (3) sano oo xadhig ah.

3. Xeer ilaaliyaha ayaa guddiga ka hor oogaya eedda ka-xayuubinta dhwsanaanta, anshax-marinta garsoorayaasha iyo ku-xigeenada xeer guud.

Qodobka 85aad

xidhiidhka hay'addaha garsoorka iyo wasaaradda caddaalada

1. Wasaaradda caddaaladdu waxay u xil saaran tahay fulinta go'aamada maamul ee ka soo baxa guddiga caddaalada.

2. Wada-shaqaynta wasaaradda iyo hay'addaha garsoorka waxa qeexaya xeer.

Xubinta 2aad

Gobolada iyo degmooyinka qodobka 86aad

qaab-dhismeedka dalka

1. Dalka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu ka kooban yahay gobollo; gobol kastaana waxa uu u sii qaybsamaa degmooyin.

2. Dhismaha goboladda iyo degmooyinka, xuduudahooda iyo derejooyinkooda xeer baa tilmaamaya.

3. Wax-ka-beddelka tirada gobolada iyo degmooyinka ama xudduudahooda, iyada oo shabaysan, waxa soo jeedinaya golaha xukuumadda, waxaana oggolaanaya golayasha (wakiillada iyo guurtida).

Qodobka 87aad

Maamulka gobolada iyo degmooyinka

1. Maamulka gobolada iyo degmooyinku waa qayb ka mid ah maamulka xukuumkadda Jamhuuriyadda Somaliland.

2. Xidhiidhka xukuumadda dhexe iyo goboladda iyo degmooyinka waxa caddaynaya xeer gaar ah.

XUBINTA 3AAD

HAY'ADAHA DOWLADDA

QODOBKA 88AAD

HAY'ADAHA DOWLADDA EE GAARKA AH

Hay'adaha Dowladda ee Qaranku waa:

- 1.. Xeer-ilaalinta Guud
- 2.. Baanka Dhexe
- 3.. Hay'adda Shaqaalaha Dowladda
- 4.. Hanti-dhawrka Guud.

Haddii loo baahdo hay'ado kale waa la dhisi karaa.

QODOBKA 89AAD

MAGACAABISTA IYO XIL-KA-QAADISTA MADAXDA HAY'ADAHA

Magacaabista Xeer-ilaaliyaha Guud, Guddoomiyaha Baanka Dhexe, Guddoomiyaha iyo Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dowladda iyo Hantidhawrka Guud, waxa soo jeedinaya Madaxweynaha; waxaana ansixinaya golaha wakiillada ka hor intaan xilka loo dhaarin.

Waxaa xilka ka qaadi kara Madaxda qodobkan ku sheegan Madaxweynaha oo keliya.

QODOBKA 90AAD

XEERKA HAY'ADAHA

Hay'ad kasta oo ka mid ah hay'adaha Dowladda ee gaarka ah waxa ay yeelanaysaa xeer u gaar ah oo qeexaya qaab-dhismeedkeeda, waajibaadkeeda iyo dhawrsanaanta madaxdooda.

XUBINTA 4AAD

QODOBKA 91AAD

MABAADI'DA CIIDANKA QARANKA

a.. Ciidanka Qaranku wuxuu u xilsaaran yahay ilaalinta iyo difaaca madax-bannaanida dalka; waxa intaa u dheer marka loo baahdo, hawlaha xilliga xukunka degdegga ah ee waafaqsan dastuurka.

b.. Ciidanka Qaranku waxa uu had iyo jeer u hoggaansamayaa oo tixgelinayaa Dastuurka iyo xeerarka dalka.

c.. Qofka loo magacaabo Wasiirka Gaashaandhiggu waa in uu ahaadaa muwaadin madani ah(Civilian).

d.. Qaab-dhismeedka Ciidanka qaranka xeer baa nidaaminaya

QODOBKA 92AAD

CIIDAMADA BOOLISKA IYO ASLUUBTA

a.. Ciidanka Boolisku wax auu u xilsaaran yahay ilaalinta nabadgelyada iyo dhaqan-gelinta xeerarka; qaab-dhismeedkooda iyo waajibaadkoodana xeer ayaa qeexaya.

b.. Ciidanka Asluubtu waxa uu u xilsaaran yahay haynta iyo toosinta akhlaaqda maxaabiista; qaab-dhismeedkooda iyo waajibaadkoodana xeer ayaa qeexaya.

QODOBKA 93AAD

HANTIDA XUKUUMADDA

Xukuumaddu waxay awood u leedahay in ay yeelato, gacnata ku hayso, hanti guurto ama ma guurto ah; in ay iibsato, iibiso, kireysato, kirayso, ku beddelato qiimo u dhigma, ama ku samayso hantidaas tasaruf kasta oo sharciga waafaqsan.

XUBINTA 5AAD

DASTUURKA

QODOBKA 94AAD

DHAQAN-GELINTA DASTUURKA

a.. Dhaqan-gelinta Dastuurku waxay ka bilaabmaysaa marka afti loo qaado, natiijada aftidu soo baxdo; waxana loogu dhaqmi karaa si ku-meeel-gaadh ah muddo saddex sano (3) gudahood oo ka bilaabmaysa taariikhda uu oggolaaday shirweynaha 3aad ee beelaha Somaliland.

b.. Haddii qabashada aftidu suuroobi weydo muddada loo xaddiday, waxaa muddada ku meel-gaadh ahaan loogu dhaqmayo Dastuurka kordhin kara Baarlamaanka (Wakiillada iyo Guurtida).

c.. Haddii ay xubin ka mid ah golaha Guurtida ama Golaha wakiillada ay ku timaaddo xaalad ka mid ah xaaladaha ku tilmaaman Qod. 29Aad, 47aad, waxaa soo buuxsanaya Beeshii uu ka tirsanaa, inta laga gaadhayo nidaamka axsaabta ee doorashada tooska ah.

d.. Haddii ay ku yimaadaan asbaabaha ku tilmaaman Qod. 65Aad Madaxweynaha iyo ku-xigeenka Madaxweynaha ama midkoodba inta laga gaadhayo nidaamka axsaabta ee doorashada tooska ah, labada gole (Wakiilada iyo Guurtida) ayaa si wadajir ah muddo (45) maalmood gudahood ku dooranaya Madaxweyne iyo ku-xigeen Madaxweyne ama midkood; iyada oo uu xilka jagada bannaanaatay muddada doorashada ka horreysa uu hayn doono Guddoomiyaha Guurtida.

e.. Dalka Jamhuuriyadda Somaliland waxa lagaga dhaqmayaa xeerarkii hore loogu dhaqmi jiray wixii ka horreeyey 21 Oct. 1969Kii, ee aan ka hor imanayn shareecadda islaamka, inta laga gadhayo soo saarista xeerar waafaqsan dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

QODOBKA 95AAD

DIYAARINTA XEERKA AFTIDA IYO MAGACAABIDDA GUDDIDA QABAN-QAABINTA AFTIDA

Si ay u suurto gasho qaban-qaabinta aftidu, waxa waajib ah in la soo saaro xeerka aftida iyada oo laga shiidaal-qaadanayo tilmaamaha Dastuurku asteeyey.

QODOBKA 96AAD

WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABIDDA DASTUURKA.

a.. Soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo/ama kaabidda dastuurka waxa leh:

b. Madaxweynaha, ka dib marka uu la tashado golaha xukuumadda.

T. 1/3 (Saddex-meelood meel) tirada guud ee golaha wakiillada.

J. 1/3 (Saddex-meelood meel) tirada guud ee Golaha Guurtida.

b.. Waxa waajib ah in soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo/ama kaabidda Dastuurku ay sababaysan tahay, saxeexan tahayna.

c.. Wax-ka-bedelka godob ama godobbo ka mid ah Dastuurka iyo/ama kaabiddiisu waxa ay ku ansaxayaan ka dib marka uu 2/3 (Saddex meelood, laba) tirada guud ee Golaha Wakiillada iyo golaha guurtidu uu mid waliba goonidiisa isugu raaco.

d.. Haddii labada gole midkood ku ansixin waayo wax-ka-beddelka ama kaabidiisa soo jeedintaa lama soo celin karo 12 (Laba iyo toban bilood).

QODOBKA 97AAD

XUDUUDDA WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABIDDA DASTUURKA

Ma bannaana in soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo/ama kaabidda dastuurku ay xambaarsanaato nuxur ka soo horjeeda:-

- b. Mabaadi'da shareecada islaamka;
- t. Midnimada dalka (Israacsanaanta dhul-ahaaneed);
- j. Mabaadi'da talo-wadaaga iyo hannaanka xisbiyada badan;
- x. Xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyadaha qofka.

QODOBKA 98AAD

SALDHIGGA IYO SARRAYNTA DASTUURKA.

a.. Dastuurka waxa saldhig u ah mabaadi'da Islaamka.

b.. Dastuurka ayaa ugu sarreeya xeerka dalka, xeer kasta oo aan isaga waafaqsanaynina waxa uu noqonayaa waxba kama jiraan.

QODOBKA 99AAD

DHAARTA DASTUURIGA AH

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo isla markaana ah Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah, ayaa dhaarinaya cid kasta oo Dastuurku ku waajibiyey dhaar, ka hor inta aanu xilkiisa bilaabin, dhaartan Dastuuriga ah. Sidoo kale waxaa isagana dhaarinaya Madaxweynaha.

'WAXA IGU WALAAHIYA, IYO BILAAHIYA IYO TALAHIYA, IN AAN U NOQONAYO DAACAD DIINTA ISLAAMKA, DALKAYGA SOMALILAND, DADKIISANA KU MAAMULAYO SINNAAN IYO CADDAAALAD INTA AAN XILKA HAYO".

Eray bixinta Erayda Dastuurka

- 1.. Qaran Nation
- 2.. Dawlad State
- 3.. Xukuumad Government
- 4.. Xukuumadda hoose Local Government
- 5.. Xeer Act Of Parliament
- 6.. Xeer-hoosaad By-law
- 7.. Sharci (Qaanuun) Law
- 8.. Mashruuc Xeer Bill.